



Lacag bixinta JobKeeper ka

Lacagbixinta JobKeeper ka Dawlada Australia sida waafaqadan, ganacsiyada xaqa u leh ee ay ku dhacday saameynta dhaqaale ee Coronavirus waxay awoodi doonaan inay helaan kabitaanka mushahaarka si ay u sii wadaan lacag siinta shaqaalahooda.

Loo shaqeeyayaasha waxay awoodi doonaan inay u dalbaan labadii toddobaadba lacag bixin dhan \$1500 shaqaalihii xaq u leh ee kasta laga bilaabo 30 Maarso 2020 ilaa 27 Sibteembar 2020.

Lacag bixinta JobKeeper Payment waxay hubineysaa in loo shaqeeyayaasha xaqa u lehi ay baaqi ku ahaadaan inay ku xirnaadaan shaqaalahooda waxayna ka caawin doontaa ganacsiyada inay dib ugu bilaabaan si dhakhso leh marka dhibkaani dhammaado.

Lacag bixintani waxay qayb ka tahay qorshaha Dawlada ee ay ku sahleyso saameynta dhaqaale ee Coronavirus iyo inay ka caawiso sidii ay u dhisi lahayd buundo dib loogu soo kabto.

Macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay loo shaqeeyayaasha

Si aad u hesho Lacag bixinta loo shaqeeyaha ee JobKeeper payment loo shaqeeyuhu waa inuu isaga diiwaangeliyaa inuu rabo inuu codsado website ka Xafiiska Cashuuraha ee Australia (ATO) ee ah www.ato.gov.au.

Loo shaqeeyayaasha sidoo kale waxay qiimeynayaan haddii ay heysato ama ay qabsan doonto hoos u dhaca dakhliga loo baahan yahay ee idin soo gala – badiba ganacsiyada yar yar , waa hoos u dhaca dakhliga boqolkiiba 30 ama ka badan, ilaa 1dii Maarso 2020 muddo ugu yaraan hal bil ah.

Hay'adaha samafalka iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn iyo sidoo kale shakhsiyaadka iskood u shaqeysta (ganacsiga aan shaqaalaha lahayn) ee fuliya u eegista dakhliga soo gala iyo shuruudaha xaq u yeelashada ayaa sidoo kale laga yaabaa inay codsadaan JobKeeper payment.

Ka qayb ahaan nidaamka, loo shaqeeyayaashu waa inay siiyaan macluumaadka shaqaalaha ee xaq u leh ATO. Tan waxaa ku jira macluumaad ah tirada shaqaalaha xaqa u leh 1dii Maarso 2020 iyo kuwa ay hadda ganacsiga shaqaalaha u leh (oo ay ku jiraan kuwa shaqada laga fadhiisiiyey ama dib loo shaqaaleeyey) .

Loo shaqeeyayaasha xaqa u leh waxay heli doonaan lacagta ugu horeysa ee JobKeeper ka laga bilaabo toddobaadka koowaad ee Maajo.

Macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay shaqaalaha

Haddii aad tahay shaqaale, loo shaqeeyahaaga ayaa ku soo wargelin doona haddii ay kuu codsanayaan lacagta JobKeeper ka iyagoo ku metelaya. Shaqaalaha badidoodu uma baahan doonaan inay wax dheeraad ah sameeyaan.

Shaqaalaha wakhtiga dhiman iyo kuwa wakhtiga buuxa, oo ay ku jiraan shaqaalaha la fadhiisiiyey, ayaa xaq u leh lacagta JobKeeperka.

Meesha shaqaale wakhti wakhti loo yeero uu la joogay loo shaqeeyihiisa si joogta ah ama si nidaam kale ah ugu yaraan 12 bilood ee hore , marka la joogo 1da Maarso 2020, waxay sidoo kale xaq u yeelanayaan lacagta. Shaqaalaha xaqa u leh laga 1da Maarso 2020 waxaa ka mid ah:

- Muwaadininta Australiyaanka ah
- Kuwa sida fiisaha joogtada ah
- Kuwa sida fiisaha Qaybta Khaaska ah ee (Subclass 444) .

Haddii aad xaq u leedahay, lacagta JobKeeper ayaa kabiyeysa qayb ama dakhligaaga oo dhan – loo shaqeeyahaaga wuxuu masuul ka noqonayaa inuu kugu siiyo lacagta nidaamkooda mushahaarka.

Shaqaalaha xaqa u leh waxay heli doonaan ugu yaraan \$1,500 labadii toddobaad, cashuurta ka hor loo shaqeeyahooda. Wax super ah lagama rabo wixii lacag dheeraad ah la bixiyo sababta lacagta JobKeeper awgeed. No superannuation guarantee payments are required to be paid on any additional payment made because of the JobKeeper Payment.

Haddii aad caadi ahaan hesho wax ka yar \$1,500 dakhli ahaan labadii toddobaadba cashuurta ka hor, loo shaqeeyahaagu waa inuu ku siiyaa, ugu yaraan \$1,500 labadii toddobaad, cashuurta ka hor.

Haddii la ogolaado codsiga JobKeeper Payment laakiinse aad hadda qaadatid JobSeeker, ama lacag kale oo oo ah dakhli ka taageerid, waa inaad soo ogeysiisaa servicea Australia xaaladaada isbedeshay ama waxaa laga yaabaa inaad deyn gasho aad dib u soo celin doontid.